



In Ka Badan 96% oo Shaqaalaha PPS ee Shaqada Ku Jira ayaa Qaatay Labadii Tallaal Markii La Gaaray Waqtigii Kama Dambeysta ahaa Gobolku u Qabtay

Gobolka Oregon wuxuu shuruud ku xiray dhammaan shaqaalihisa inay ka tallaalan yihiin xanuunka COVID-19 taasi oo aan wax saameyn ah ku yeelan doonin fasalada Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo shaqaalaha jooga dhismayaashiisa. Iyada oo maalintii kama dambeysta ahaa ee gobolku u qabtay ay tahay maalinta Isniinta, Oktoobar 18, in ka badan 96% oo ah shaqaalaha degmada ah ayaa qaatay dhammaan labadii tallaal.

“Waxaan aad ugu faraxsanahay iyada oo aan aad ugu hanweynahay inay intii badneyd shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Portland ay si buuxda iskaga tallaaleen xanuunka COVID-19,” sidaasi waa yiri Guddoomiyaha Waxbarashada PPS, Guadalupe Guerrero. “Tani maaha kaliya calaamad muujineysa sida ay shaqaaluhu ugu heelan yihiin inay ilaaliyaan ardayda, laakiin waxay muujineysaa fahamka guud inuu tallaalka yahay waxa ugu wanaagsan ee la iskaga ilaalin karayo fayriska dilaaga ah.”

Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waa degmo dugsiyeedkii K-12 ee ugu horeeyey gobolkan ee ku dhawaaqa shuruuda tallaalka. Tirooyinka ugu muhiimsan:

- **96.3%** shaqaale tiradoodu dhan tahay 7,426 waxa ay soo wargaliyeen inay qaateen labadii tallaalka oo ay si buuxda u tallaalan yihiin
- **1.3%** waxay soo waregliyeen ugu yaraan inay qaateen hal tallaal. Shaqaaluhu waxay ku jiraan sidii ay u heli lahaayeen oggolaansho ka dhaafid ku-meel-gaar caafimaad ah ilaa iyo inta ay soo dhammeystirayaan labadii tallaalka ee looga baahnaa.
- **2.4%** shaqaalaha soo wargaliyey inayna qaadan tallaalka, 158 ka mid ah waxay codsanayaan in caafimaad ahaan looga dhaafo ama diin ahaan, iyada oo 111 loo oggolaaday in laga dhaafo. Kuwa aan ka soo jawaabin sahankii shaqaalaha loo diray waxay u badan yihiin inay ku maqan yihiin fasax-maqaansho, macallimiinta ku meel gaarka ah wax u dhigta oo aan hadda shaqeyn, shaqaalaha ku meel gaarka ah ama tababarayaasha aan iyaguna hadda shaqeyn.

“Macallimiintayadu way na dhiirigalinayaa dhammaantayo sababtoo ah waxa ay rabaan inay wax u qabtaan ardaydeena,” sidaasi waxaa yiri Madaxa Shaqaalaha PPS Sharon Reese.” Waxay u heelan yihiin una taagan yihiin wanaaga iyo ilaalinta ardayda. Tanina waa calaamad kale oo lagu garan karo dadaalkooda.”

Waxaa jirta tiro yar oo shaqaalaha ka mid ah kuwaasi oo la galiyey fasax bilaa mushahar ah iyaga oo aan ku soo noqon karin shaqada maadaama Waaxda Shaqaalaha PPS ay ku gudo jirto sidii ay ugu qaadi lahayd tallaabo anshax-marin shaqada looga saarayo. Tiradaasi waxaa ka mid ah afar macallin, shan kalkaaliyaal macallimiin, 10 shaqaalaha nadaafada ah, lix shaqaalaha cuntada,iyo saddex wadayaasha basaska ardayda ah.